In urur la dhiso

Urur ama iskaashato waa qaab kooxi ku wada shaqaynkaraan si ay u meelmariyaan ujeeddo ka dhaxaysa. Dalkan Iswiidhan cidwaliba waxay xaq u leedahay inay dhisto iyo inay ka shaqayso urur.

Sidaas darteed dhisidda ururadu waa mid fudud iyadoo ay asaas u tahay saddexda arrimood ee hoos ku qoran:

- Xubno
- Maamul lagu doorto kulanka guud ee xubnaha
- Xeer laga asixiyey xubnaha



Ugu horrayn waxay dhacda marka la dhisayo urur in fekradi ku dhalato qof ama dhawr qof, kuwaas oo kala sheekaysta fekraddaa dadka ay bidayaan inay isla arki karaan. Tallaabada xigtaa waa in dadkii fekradda isla arkay kulmaan, isla rogrogaan nooca ururka ay rabaan, doortaan guddi kumeelgaadh ah, cid ka mid ahna u xilsaaraan soo diyaarinta distuur iyo inay ka tashadaan meesha iyo xilliga a ay kulmayaa. Inta aan la kala tegin waxa la qoraa magacyada, ciwaanada iyo telefoonada dadka ka soo qaybgalay shirka.

Xeer - sharciga ururka
Muxuu ka koobnaanyaa? Xeerku waa in aanu ka hor iman qaanuunka dalka, laakiin wixii ku saabsan shaqada ururka waxa doorashada iyo go'aankeeda leh xubnaha ururka oo keliya. Way jiraan iskaashatooyin (riksorganisationer) ururada xubnaha ka noqonaya ka raba inay sharcigooda ku qoraan waxyaabo gaar ah si ururku xubin uga noqonkaro iskaashatooyinkaas. Hasse ahaatee marwalba go'aanka kamadambaynta ah waxa iska leh xubnaha ururka.

Sida caadiga ah wuxu xeerku ku bilowdaa magaca ururka iyo ujeedadooyinkiisa. Ujeeddada ururku waa qodobbo ka jawaabcelinaya su'aasha ah; Maxaa looga jeedaa waxqabadka kala duwan ee ururka. Waxa ku xigta cidda ururka xubin ka noqonkarta, waajibaadka iyo xuquuqda xubinta.

Waxa kale oo xeerka dhexdiisa lagaga hadlaa waajibaadka maamulaka iyo hantidhowrka iyo sannadxisaabeedka ururka. Sidoo kale waxa lagu faahfaahiyaa arrimaha lagaga hadlayo shirsannadeedka, qaabka loo beddelikaro xeerka iyo sida ururka loo xidhi karo hadday lagama maarmaan noqoto.

Taas micneheedu ma aha in xeerku intaa ku koobnaado marwalba, balse waa lagu qori karaa waxyaabo kale laakiin kuwaasi waa qodobbada badiba ururadu ku qoraan.

Maamul kumeelgaadh ah

Liska waxyaabo lagama marman ah

Listadan waa waxyaabaha ay habboontahay in dib lo xususto marka urur la samaynayo:

1. ka dooda oo isla meel dhiga arrinta ku saabsan maxaa ururku ka shaqayn doonaa. Warqad ku qora waxyaabaha aad isla meeldhigtaan.
2. Raadiya oo isukeena inta ugu badan ee dadka ugu badan ee suurogal ah ee doonaya inay ka qaybqaataan ururka ka shaqayndoona waxyaabaha aad isla aragteen. Sameeya liis ku saabsan magacyada, ciwaanada, telefoonada, iyo weliba e-mailka dadka diyaarka ah. Taasi waxay gogoldhig u noqonkartaa liiska xubnihiinna.
3. Xubnaha oo dhan isugu yeedha oo ha isugu yimaaddeen shirkii gogolxaadhka ururka, kaas oo aad ku dooranaysaan guddi kumeelgaadh ah oo (interimsstyrelse). Guddidaas oo xilkoodu yahay inay fekrad ka soo diyaariyaan xeerka, xubnaha maamulka iyo dhigaalka islamarkaasna ugu yeedhaan xubnaha shirka asaaska ururka (konstituerade möte).
4. Shirka asaaska ururku wuxu:
    a. dooranayaa: guddoomiyaha, xoghayaha iyo codtiriyaha shirka
    b. goaan ka gaadhayaa dhisitaanka ururka
    c. waxyaabaha lagu qorayo xeerka ururka
    d. goaaminayaa inta uu noqonayo dhigaalka ururku
    e. dooranayaa guddiga - fulinta, odhadka iyo guddiga soodiyaarinta doorashada labaad ee guddiyada fulinta iyo odhadka.
5. Shirka ka dib guddiga maamulka ee cusubi waxu isugu imanayaa sida ugu dhaqsabadan ee suurogal ah shirkiisii ugu horeeye ee aasaaska xilqaybsiga iyo qorshaynta maamulkooda (shirkaas oo kale waxa guddiga maamulku isugu imanayaa doorasho kasta ka dib). Shirkan waxa lagu:
    a. Gorfaynayaa sida guddiga fulintu u kala qaybsanayo xilka iyo hawlaha, wixii aan shirwaynuha ururku hore u go'aamin.
    b. Cidda ka mid ah guddiga fulinta ee u xaqleh saxeexa ururka, furidda koonto waxna ka saari karta koontada ururka.
    c. Xilliga iyo meesha guddiga fulintu ku kulmayo shirka soosocda.
6. Sida ugu dhaqsa badan ee suurugal ah, marka brotokoolka laga saxeexo guddigii maamulka shirwaynaha iyo shirka ugu horeeya ee guddiga fulinta waa in la qoro *protokollsutdrag* (waxyaabo laga soo qaatay brotokoolka shirwaynaha). *Protokollsutdrag* waxa lagyu qoraa waxyaabo ay ka midyihiin go'aanka ku saabsan xeeka ururka, inu shirwaynuhu doortay guddiga fulinta iyo goaanka guddiga fulinta ee ku saabsan cidda yeelanaysa saxeexa ururka iyo cidda koonto furi karta. Koobi (dhawr) ka siamaysta *protokollsutdrag* iyo xeerka ururka kaas oo aad u aad siinaysaan heyadda u baahan, bangigiyada, boosta, shirkadaha guryaha iyo ciddii kale ee ururku la macaamiloonayo.

Haatan waad ka soo baxdeen waxyaabihii rasmi ahaan loo baahnaa si ururkiinnu u noqdo urur bulsho (ideell förening): waxad leedihiin: Xubno, xeerhoosaad iyo guddi fulineed. Haatan hadaba waxa la soo gaadhey in aad u shaqaysaan sidii ururku u yeelanlahaa waxqabad (Verksamhet) ku salaysan ujeedadii hirgelinteeda aad ururka u samayseen. Mana jiro urur ujeedadiisu tahay inu jiro oo keliya. Ururku waa waddadii lagu gaadhi lahaa waxyaabaha xubnuhu doonayaan.

Qaamuuska ereybixinta urureed

Anmälningsplanket (Warqadda isdiiwaangelinta)	Waa warqad lagu codsanayo in laga qaybqaato adeeg sida ka qaybgelidda kooras ama tartan iwm.
Ansvarig (u xilsaaran, dummadda ku qaaday)	Qofka isaga loo xilsaaray fulinta arrin isagaa ka masuul ah fulinteeda
Ansvarisfrihet (xilkaberiyeelis)	Aqoonsi xilgudasho uu shirsannadeedku bixiyo taas oo shirsannadeedka iwm. Lagu siiyo qof ama guddi oo micneheedu yahay cadday in qofkaasi ama guddigaasi siwaagsan u gutey xilkiisii.
Arvode (sooryo)	Sooryo (badiba lacag) mararka qaar qof xil loo diray la siiyo sida qof deris ama koorso bixiya ama hawl u safray darteed. Qofka sooryo la siiyaa (arvode) waa inu waxa lasiiyey ka bixiyo cashuur oo ku qoro warqadda cashuurcelinta sannadka (deklaration). Qofka sooryadaas bixinayaa isagaa bixinaya cashuurta iyo dhigaalka bulsha (sociala avgifter).
Avtal (Heshiis)	Heshiis dhexmara laba ama dhinacyo badan.
Bankgiro (koontada bangiga)	Qaab lacagta loogu kala gudbiyo bangiyada.
Beslut (Go'aan)	Marka la doonayo in dhinac laga qaato arrin laba ama dhawr weji yeelankarta waxa la qaataa go'aan
Blankett (arji)	Warqad qoraal daabacan leh, kaas oo meelo buuxbuuxin u baahani ka bannaanyihiin
Boka (lokal) (ballansiga goob kulan)	Heshiis qoraal ama af ah ah oo dhexmara cidda leh goobta kulanka iyo cidda u baahan inay wax ku qabsato. Ururada qaarkood waxay ku helaan bilaash taas oo ku xidhan cidda doonaysa iyo waxa lagu qabanayo.
Bokföring (xisaabin)	In lagu qoro - buugga maqalka ama kumbuyuutarka – wixii soo galay iyo wixii baxay, faaiidada iyo daynta xilli go'an.
Budget (bajad)	Qorshayn ku saabsan dhaqaalaha iyo qarashka la filayo inay ku yimaaddaan ururka iwm xilli tilmaaman (tusaale ahaan sannad)
Circelledare (hoggaamiyaha aqoonkalakalakorodhsiga)	Qofka isku dubbaridaya aqoonkala korodhsiga. Badiba hoggaamiyaha aqoonkalakalakorodhsigu maaha macallin uma aha kooxda wax kala faadiidaysanaysa. Waase qof dadkaasi u doorteen uni isku habeeyo isu imaatinka dadkaasi ku kala faaiidaysanayaan arrin ay wada xiisaynayaan.
Dagordning (liiska arrimaha la falanqaynayo, ajamdaha)	Liis lagu koobay arrimaha lagu falanqaynayo shirka, halkaas oo looga jeedo in la garto sida loo kala horaysiinayo
Deltagar avgift	Gunno / dhigmo - laga qaado qofka ka qybqaadanaya kooras iwm.
Deltagarlista (liiska kaqaybqaataha)	Liis lagu qoray magaca, ciwaanka (mararka qaarkood telefoonka iyo e.mailka) dadka ka qaybqaadanaya waxyaabo hore loo qorsheeyey sida kooras, aqooniswaydaarsi, shir, saffar iwm.
Diskussion (falanqayn)	Badiba waxa looga jeedaa falanqayn ka dhaxaysa laba qof ama in ka badan taas oo la is dhegeysanayo laysna dhaafsanayo fekrad ama talo, qofwalibana soo bandhigayo sidey isaga la tahay xalka arrimaha laga hadlayaa. Falanqayn (diskussion) waxa soo bandhigi kara qof keliya isagoo u adeegsanaya buug iwm.
Diskutera (falanqeeya)	Eeg kelmadda soo hormartay. Diskutera waxa looga jeedaa in laga qaybqaato *diskussion* socda.
Eniga (waafaqsan)	Waxa laga wadaa in dad isku aragti ka qabaan arrin, halkaas oo la odhanayo way iswaafaqsan yihiin (är eniga om)
Fastställa	Go'aan ka gaadhista faalayn ka dib.
Firmatecknare (cidda saxeexa leh)	Cidda guddida fulinta ugu qaabilsan saxeexa ururka iwm, kuwaas/kaas oo loo xilsaaray inay magaca ururka ku saxeexaan marka loo baahdo.

Föredragande (sharraxbixiye)	Qof shir gudihii ka soo jeediya sharraxa fekraddiisa ku saabsan waxyaabaha ay ku wanaagsantahay in la gaadho go'aankaas iyo sababihiisa.
Förhandling (kawada xaajood)	In arrin lagala xaajoodoodo dhinacyo ka soo horjeeda si la isugu raaco arrin haddii dhinacyada kala duwani aqbalaan
Förtäring	Cunto ama cabbitaan
Granska (baadhis)	Baadhitaan qotadheer iyo hubin la hubinayo saxusocodka urur, shirkad iwm .
Handuppräkning (gacmakorutaag)	Gacantaagis. Waxa caadiahaan loo isticmaalaa marka shirka dhexdiisa gacmaha korloo taago si loogu codeeyo arrin, halkaas oo la tiriyo codka inta gacmaha taagtey.
Häftapparat (Qardhab)	Qalab loo isticmaalo si laisugu lifaaqo (dhejiyo) waraaqaha.
Ideelförening (urur bulsho)	Urur loo dhisan si loo gaadho dan xubno ka dhaxaysa ama xaqiijinta fekrado ay dad wada qabaan. Ideelförening wuu noqonkaraa urur dhaqaale, laakiin waxqabadka dhaqaale badiba waa dhaqaale loogu talagalay bixinta danaha xubnaha. Haddii waxqabadka ururku isugusoo ururo dhaqaale waa in ururku cashuur ka bixiyo wixii u soo xerooda. Ururada waxqabadkoodo u badanyahay arrimo dhaqaale waxa jira qaabuureed u gaar ah oo loogu yeedho *ekonomiska förening* kaas oo leh qaanuun u gaar ah ururada dhaqaalaha. Ururada loo yaqaanno *Kooperativ* noocyadooda kala duwani waxay soo hoos gelayaan *ekonomiska förening*. Laakiin ururada ideelka ah ma jiro sharci gaar ah oo xaddidayaa marka laga reebo sharciga guud ee dalka.
Inbetalningskort (warqadda bixinta lacagta)	Warqad gaar ah oo loo adeegsado in lagu bixiyo lacagta. Waxana ay u kala baxaan mid loogu talagalay in lagu bixiyo boostada iyo mid lagu bixiyo bangiga
Inbjudan (Martiqaad)	Farriin ku saabsan martiqaad, badiba qoraal ah kaas oo loo fidinayo tusaale ahaan xubnaha ururka iwm. in ay ka soo qaybgalaan shir, kooras, xaflad, tartan iwm.
Informationsblad (dhambaal)	Farriin qoraal ah oo ku saabsan warbixin maamulka ururku doonayo inu xubnaha gaadhsiiyo. Badiba Informationsblad waxay noqotaa wargeys yar oo xubnaha loo diro.
Interimstyrelse	Guddi ay iska doortaan dadka doonaya inay dhisaan urur shirka asaaska ka hor. Interimstyrelse waxa loo dhisaa si ay fekrad uga soo jeediyaan xeerka ururka, guddiga fulinta iyo dhigaalka ururka.
Juridiskt (Sharciyaysan)	Si sharciga waafaqsan
Juridiska person (shakhsharciyeed)	Shirkad, urur, dawlad, degmo ama kulan kale oo dhinac ka noqonkara dadka caadiga ah ee mujtamaca.
Justera (hubi)	Waa kelmad badiba loo isticmaalo hubinta qoraalka brotokoolka iyo in loo tilmaamo xoghayaha shirka wixii khalad ah ee ku sugan qoraalka shirka.
Justering (hubin)	Waxay magac u tahay marka la hubinayo qoraalka borortakoolka. Badiba waxa hubinta loo sameeyaa shir u gaar ah marka xoghayu la hubinayo gudoomiyihii shirka wixii la qoray xilligii shirku socdey.
Kalenderår (sannadka kalandarka waafaqsan)	Wuxu ka bilaabmaa 1/1 ilaa 31/12 ee sannadkaa laga hadlayo.
Kallelse (u yeedhis)	Farriin (badiba qoraal ah) loo diro xubnaha (ururka, maamulka ama guddida) oo ku saabsan inay ka soo qaybgalaan shir xilli iyo meel la magacaabay.
Kandidat (musharrax)	Qof loo sharaxay inu qabto muhimmad ama jago. Badiba waxa lasoo gudbiyaa dhayr qof oo la kala doorto.
Kassabok (buugga sanduuqa)	Buug leh layman iyo jeexjeex madhan oo lagu buuxbuuxiyo wixii lacag soo gashay iyo qarashka qarashka baxay.
Kassaskrin (maqal)	Sanduuq qafilma oo lacagta lagu rido.
Kassör (khasnaji, maqalhaye)	Qof loo xilsaaray maamulidda dhaqaalaha ururka iwm.

Kommentar (qiimayn)	Tacliiq ama qiimayn qof ka bixiyo dhacdo ama fekradsoojeedin hore.
Kompromiss (isu soo degis)	Xal dhexdhexaad oo la isugu yimaaddo loollan, ismaandhaaf ka dib. Taas waxay ku dhacdaa in cidwaliba waxay doonaysey wax ka tagto waxna u meelmaraan.
konstituerande möte (shirka asaaska)	Waxa badiba loo isticmaalaa shirka dhisidda ururka, marka ugu horaysa ee ururku yeesho qaab yeesho, yeesho guddi fulin iyo xeer marka laga hadlayo guddiga fulinta waa marka ugu horaysa ee ay jagooyinka iyo shaqada qaybsadaan.
Kostnader (qarash)	Qarashka ku baxa hawlaha kala duwan ee ururka
Kupp (inqilaab)	Shaqo aan laysku ogayn oo qof ama dad ku kacaan si ay fekraddooda u meelmariyaan iyadoo aaney cid kale fursad u siinin inay fekraddooda dhiibtaan.
Kvitto (rasiidh)	Rasiidh caddaynaya qarashka baxay.
Medlem (xubin)	Qofka xubin ka ah tusaale ahaan urur iwm.
Medlemsavgift (dhigaalka xubinta)	Dhigaalka xubinnimada oo ah lacag ururku ka helo xubnihiisa si uu ugu meel mariyo hawlihiisa.
Medlemsförteckning (liiska xubnaha)	Listo ku saabsan xubnaha ururka magacyadooda iyo ciwaanadooda iwm.
Medlemsmöte (shirxubneed)	Shir qaab gaar ah loogu yeedhay dhammaanba xubnaha ururka xilli ku cad xeerhoosaadka
Medlemsregister (Medlemsförteckning)	Listo ku saabsan xubnaha ururka magacyadooda iyo ciwaanadooda iwm.
Minnes antekningar	Xusuusqor qof qoray isagoo u cuskanaya xusuustiisa ku saabsan wixii laga yidhi shir iwm
Motion	Fekradsoojeedin qof ama xubini u soo bandhigay shirka ururka iwm
Mötesordförande (Guddomiye)	Qof loo doortay in guddoomiyo shirka si uu u qaybiyo hadalka oo habeeyo fekradaha, codaynta si loo ogaado arrimaha codku u badanyahay ee assaxay iwm.
Namnteckning (Saxeex)	Saxeex gacanta ah oo ah caddayn qofkaasi caddaynayo inu ka masuuliyadda waxa uu saxeexay qaadayo
Omröstning	Marka xubnuhu iwm. u codeeyaan arrimaha dadku ay taageerayaan dabadeedna la xisaabinayo codka si loo ogaado arrinta loo badanyahay oo ah ta la asixinayo
Ordet fritt	Marka dadkoodhan loo furo ciddii fekrad dhiibanaysa oo ay dhammaadaan ciddii hore loo qoray. Marka guddoomiyuhu yidhaahdo Ordet är fritt waa dalab ku saabsan in si guud looga doodo.
Organisationsnummer	Nambar u gaar ah ururka, shirkad iwm. Ururkastaa Sverige wuxu leeyahay *organisationsnummer* kaas oo ka dhigan bersoonnambarka dadka laakiin ku gaar ah ururada.
Poster	Marka laga hadlayo ururada micneheedu waa hawl gaar ah, laakiin kelmaddu wexey leedahay micnayaal kale
Postgiro	Qaabxisaabeed lacagta ay isugu diraan - laba qof, shirkadood ama jamiciyadood iwm oo boostada Sweden leedahay.
Praxis	Wax caadi noqday oo cidi samayso xataa haddii aaney sharci ku qornayn.
Protokoll	Qoraal ku saabsan wixii ka dhacay ama ka soo baxay kulan maamul oo uu qoray xoghaye, ayna hubiyeen oo asixiyeen "*shirhubiyayaal*" shirku u xilsaaray arrintaas.
Protokolljusterare (shirhubiye)	cid shirku u doortay hubinta borotokoolka shirka. Badiba ciddaasi waxay noqotaa guddoomiyihii, xoghayihii iyo hubiyayaasha shirka. Taasi waxay u dhacdaa in guddoomiyaha iyo hubiyayaashu akhriyaan oo la hubiyaan xoghayahu borotokoolka uu soo qoray. Markaa ka dib ayaa

	guddoomiyaha iyo hubiyayaashu saxeexa xoghayaha hoostiisa waxay ku qoraan kelmadda (Justeras), taariikhda maalintaas iyo saxeexooda.
Revisör	Qof shirsannadeedku u doortay inu ilaaliyo oo hubiyo hawlaha guddiga fulinta dhaqaale iyo shaqa ahaanba si uu u hubiyo in guddigu shaqadiisa u gutto sidii ay ahayd. Kelmadda revisör (odhad) waxa kale oo ay noqonkartaa qof xirfad iyo aqoon u leh arrimaha xisaaba oo sidaas ku sheqeeya.
Rekneskapsår xisaabsannadeed	12: ka bilood ee uu ka koobanyahay xillisannadeedka ururku u cayimay in xisaabxidhkiisu ku ekaado.
Röstlängd	Dadka doorashada ama shirka cod ku leh ee xaq u leh inay codeeyaan.
Sekraterare (xoghaye)	Qofka shir loogu doortay inu tixraac ka qoro. Sekraterare (xoghaye) maamul ahaan wuxu leeyahay waxqabad kale, tusaale ahaan wuxu u xilsaaranyahay u xoghaynta iyo habaynta qoraalka ururka, iyo xidhiidhka qoraal ee ka dhexeeya ururka iyo ururada kale- shirkadaha, hey'adaha dawladda iyo ashkhaastaba.
Självändamål	Arrin keligeed himilo ah.
Skattemyndighet	Wakaaladda dawladda Sweden u qaabilsan arrimaha cashuuraha ee ay go'aamiyeen dawladda, golaha wakiillada, gobolada iyo degmooyinku. Waxa kale oo ay qaabilsantahay arrimaha diwaangelinta degaanka ee dadka, ururada iyo shirkadaha.
Stadgar (xeer hoosaad)	Sharciga ururka ee u gaarka ah, kaas oo ah heshiis u dhexeeya dadka xubnaha ka ah ururka.
Studiecirkel	Koox dad ah oo u kulma si ay arrin ey wada xiisaynayaan taas oo ay rabaan inay wax dheeraad ah ka ogaadaan. Studiecirkel waa qaab dadku isugu gudbiyaan waxyaabaha aqoonta dadkaasi u leeyihiin arrinta ay wada xiisaynayaan.
Studieorganisatör	Qofka ururka u xilsaaran isku dubbaridka studiecirkel, koorsooyin, booqasho iyo aqooneed xubnuhu u baahanyihiin. Badiba Studieorganisatör isagu qasbana ka qaybqaadashada arrimahaas laakiin wuxu/ waxay ka tahay isku dubbaride
Studieplan	Qorshe kooban oo ku saabsan qaabka habaynta *studiecirkel* sida qalabka, meesha iyo xilliga isu imaatinka iwm.
Styrelse	Xubnaha ururku ku doorto shirsannadeedka si ay u maamulaan hawlaha ururka.
Styrelsemöte	Shirka guddiga fulinta. Waa shirka guddigu isugu yimaaddo si uu go'aan uga gaadho arrimaha ururka ee horyaalla. Waxa aad u muhim ah in xubnaha guddigu wada heleen yeedhmada shirka xilli ku filan, taas oo ay ku caddahay meesha goorta shirka lagu qabanayo.